SHARCI L. 30 ee 15 Agoosto 1979 Dib u Habeynta Lebiska iyo Qalabka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

## MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Tiradoodu tahay 1,17 19, ee 1dii Luulyo 1976;

ISAGOO FIIRIYEY: Dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee lam. 215054 ee 29kii Jannaayo 1963;

ISAGOO DHAGEYSTAY: Go'aanada Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada:

MARKUU AQOONSADAY: In loo baahan yahay in dib loo habeeyo lebiska iyo qalabka Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed

## WUXUU XEERIYEY

Sahrciga soo socdo: ee lambarkiisu yahay 30A7/8/1979

### Qodobka 1aad

Xubin kasta oo ka mid ah Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed marka uu Ciidanka ku soo biiro ama dib loo qoro wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo lacag la'aan dharka iyo qalaka militeriga ee soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| — Sarwaal dheer | Tir. | 2 xabbo |
| — Shaati gacma gaab ah | Tir. | 2 xabbo |
| — Jubadda Saraakiisha iyo Kormeerayaasha | Tir | 2 xabbo |
| — Lebiska Saraakiisha ee Xaflaaha | »» | 2 Joog |
| — Kabaha Saraakiisha ee Xafladaha | Tir. | 1 Joog |
| — Sarwaal gaaban n | Tir. | 1 xabob |
| — Kabaha gaaban ee Saraakiisha & S/Xigeennada | »» | 1 Joog |
| — Kahaha buudka ah ee madow | »» | 1 Joog |
| — Lugo gashi gaaban ee Kaaki ahee | »» | 2 xabbo |
| — Koofida Madow (Basco Azzuro) | »» | 1 xabbo |
| — Derejida Ciidanka | | |

| | | |
|---|---|---|
| — Suunka badow ee Maaska ah | »» | 1 xabbo |
| — Suunka Saraakiisha iyo Kormeerayaasha | »» | 1 xabbo |
| — Suunka Shiraaca ee Daraawiishta | »» | 2 xabbo |
| — Garoon shiit | »» | 1 xabbo |
| — Kubeerto | »» | 1 xabbo |
| — Kahoodka Dhaxanta | »» | 1 xabbo |
| — Mara Kaneeco | »» | 1 xabbo |
| — Hugaha Roobka | »» | 1 xabbo |
| — Funaanada dhaxanta | »» | 1 xabbo |

— Gaweeto »» 1 xabbo
— Buraashadda Biyaha »» 1 xabbo
— Koofida Saraakiisha »» 1 xabbo
— Tuute »» 1 Joog
— Koofida Kormeerayaasha »» 1 xabbo
— Usha Saraakiisha iyo Kormeerayaasha »» 1 xabbo
— Koofida birta ah (Almeetto) »» 1 xabbo
— Koleyga dharka »» 1 xabbo
— Koleyga rasaasta »» 1 xabbo
— Kabaha Saandalka ah »» 1 Joog
— Shukumaano »» 1 xabbo
— Firimbi »» 1 xabbo
— Xariga firimbiga »» 1 xabbo
— Galuusyo waaweyn »» 4 xabbo
— Galuusyo yar yar »» 6 xabbo
— Calaamada shaatiga (Allamaria) »» 1 Joog
— Calaamada Koofida (Freeggio) »» 1 Joog
— Jungalka Daraawiishta »» 1 Joog
— Koofida Jungalka »» 1 xabbo
— Suunka Jungalka »» 1 xabbo
— Cigaalka Daraawiishta »» 1 xabbo
— Ganbaluuska Fasamayaqaanada »» 2 xabbo
— Fasaleeti »» 2 xabbo
— Sarwaal dheer ee fardoolevda »» 1 Joog
— Sariir caadi ah iyo furaashkeeda »» 1 xabbo

## Qodobka 2aad

1. Qof kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed wuxuu xaq u leeyahay in loo cusbooneysiiyo lacag la'aan Sanad walba mar dharka iyo qolalka militeriga ee soo socda:

— Sarwaal dheer Tir. 2 xabbo

## Qdobka 2aad

— Sarwaal dheer Tir. 2 xabbo
— Shaati gacmo gaab ah »» 2 xabbo
— Jubbadda Kormeerayaasha »» 2 xabbo
— Sarwaal gaaban »» 1 xabbo
— lugu gashi gaaban »» 2 Joog
— Marakaneeco »» 1 xabbo
— Kabaha buudka ah »» 1 Joog
— Kabaha gaaban (Scarpe basse) »» 1 Joog
— Jungalka Daraawiishta »» 1 Joog
— Koofida Jungalka »» 1 xabbo
— Koofida Madow (Basco Azzurro) »» 1 xabbo
— Xariga Firimbiga »» 1 xabbo
— Shukumaane »» 1 xabbo
— Fasaleeti »» 2 xabbo

— Shaatiga Taraafiko ee (Taateriks) »» 2 xabbo
— Kabaha Saandalka ah »» 1 Joog
— Dharka Jeebabka lebiska »» 1 yaardi ninkiiba

2. Qof kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, wuxuu xaq u leeyahay in loo cusboonaysiiyo lacag la'aan labadii sano mar dharka iyo alaabta militeriga ee soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| — Funaanadda dhaxanta | Tiro | 1 xabbo |
| — Kubeerto | »» | 1 xabbo |
| — Kabaha Saandalka ah | »» | 1 Joog |
| — Dharka tuutaha | | 1 Joog |
| — Koofida Saraakiisha | »» | 1 xabbo |
| — Koofida Kormeerayaasha | »» | 1 xabbo |
| — Cigaalka Daraawiishta | »» | 1 xabbo |
| — Sarwaalka Fardooleyda | »» | 1 xabbo |

3 Qof kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaalyeed wuxuu xaq u leeyahay in loo cusbooneysiiyo lacag la'aan Afartii sano mar dharka iyo alaabta militeriga ee soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| — Garoon shiid | Tir. | 1 xabbo |
| — Kaboodka dhaxanta | »» | 1 xabbo |
| — Hugaha roobka | »» | 1 xabbo |
| — Koleyga dharka | »» | 1 xabbo |
| — Calaamada shaatiga (Allamaria | »» | 1 Joog |
| — Kolayga rasaasta | »» | 1 xabbo |

## QODOBKA 3AAD.

Markii uu Ciidanka ku soo biiro wixii ka dambeeya, sarkaalka ka tirsan Ciidanka Boolika Soomaaliyeed. wuxuu iibsanayaa- dharka isku jooga ah bacdama lacag loo siiyo hasee yeeshee wixii kale ee dhar iyo qalab Mileteri ah wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo loona cusbooneysiyo lacag li'aan sida uu tilmaamayo Qodoka 2aad ee Sharcigaan.

## Qodobka 4aad.

Kharajka ku baxa dhar iyo qalabka Milateriga ee ku xusan qodobka 1aad iyo kan 2aad, waxaa bixinaaya xilna ka saaran yahay Dawladda Soomaaliyeed. sidoo kale kharajka ku baxa dayactirka, daryeelka iyo cusbooneysiinta dharka iyo qalabka Milatariga ee Ciidanka Boolisku leeyahay oo iyadoo hawl Qaran la hayo, sabab awoodda Aadamiga ka weyn darteed, Burbura, luma ama dhaqan gaba, waxaa bixinaya Dawladda Soomaaliyeed,

## Qodobka 5aad.

Qofka Ciidanka Boliska ka tirsan ee la siiyo dharka iyo qalabka Milatariga ee ku xusan Qodobka 1aad iyo kan2aad wu-xuu xaq u leeyahay inuu ku isticmaalo, nase yeeshee waa ka Xaaraan inuu gado (iibiyo) ama cid kale siiyo.

## QODOBKA 6AAD.

Qof kasta ee ka tirsan Ciidanki Boliiska markuu hawsha Ka fariisto, ka tago, laga eeryo ama geeriyoodo, waa in laga soo celiyaa loona gudbiyaa Kayd-nta dhexe ee Ciidanka Boliiska Qalabka milatariga ee hoose ku tilmaaman:

1) — Calaamada shaatiga (Allamaria);
2) — Calaamada Koofida (Fereejo)
3) — Suunka;
4) — Koofida;
5) — Buraashadda;
6) — Galuusyada;
7) — Deerejada;
8) — Firimbiga
9) — Gaweetoda
10) — Kaboodka
11) — Hugaha roobka
12) — Kubeertada
13) — Kolayga dharka
14) — Ulaha Saraakiisha
15) — Sariirta iyo gogosheeda
16) — Garoon-shiidka

## Qodobka 7aad

Dharka iyo qalabka militeriga ee hoos ku qoran markii la tixgeliyo sameyskooda midabkooda, cabbirkooda, iyo qaabkooda, waxaa gaar u leh Calaamad lagu soocana u yihiin habka iyo muuqaalka lebiska Ciidanka Booliska Soomliyeed, sidaa darteed hay'adaha kale ee ka tirsan Ciidamada Qalabka sida iyo cid ka-leba kuma darsan karaan lebiskooda iyo qalabkooda militeriga:

1) — Calaamadda Shaatiga oo ka sameysan bir kormaatada ah ama dun arjientada ah;
2) — Koofida madow (Basse Assure)
3) — Koofida Saraakiisha iyo Kormeerayaasha ay ku heeraar-san tahay mara buluug ah;
4) — Xariga Firimbiga ee buluugga ah;

5) — Usha madow ee madaxa ku leh Calaamada Booliska ee Saraakiisha iyo Koreerayaasha

6) — Calaamooyinka dereejada oo ka sameysan bir koroomatida ah.

7) — Galuusyada iyo calaamada koofida oo ka sameysan bir-kormeetida ah.

### Qodobka 8aad

Sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

### Qodobka 9aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa maalintii uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
Madaxweynaha J.D.S.